



Fadlan ka jawaab su'aalaha si aad nooga caawiso diyaarinta siyaasado hagi doona shaqada isqorista iyo dheellitirka barnaamijka

Iyagoo Dugsiyada Dadweynaha Portland sii wadaan hannaan sanado badan qaadanaya si loo dheellitiro isqorista ardayda iyo barnaamijyada degmadeena oo dhan, Guddida Waxbarashadu waxay ku hawlan yihiin dib-u-eegista saddex siyaasadood oo hagi doona shaqada.

Si ay uga caawiyaan xogogaalnimada dib-u-eegisyadan, kooxda Kaqaybgalka Bulshada ee degmadu waxay ku ururinaysaa jawaabcelin waydiimo qoran.

[Kaqaybgal waydiimaha qoran](#)

Saddexda siyaasadood ee wax laga baddalayo waa (dhagsii magaca si aad u akhrido siyaasadda oo dhammaystiran):

- **[4.10.045-P: “U Qaybinta Ardayda ee Dugsiyada Xaafadda.”](#)** Siyaasaddu waxay aasaasaysaa hannaan ardayda loogu qaybinayo dugsiyada xaafadda, waxayna siinaysa tilmaamo joogto ah wixii isbaddallo ah ee lagu samaynayo xuduudaha dugsiya.
- **[4.10.051-P: “Qorista iyo Baddallada Ardayda.”](#)** Siyaasadda waxa loogu talagalay inay bixiso in ardayda deegaanka oo dhama u sinnaadaan helitaanka ikhtiyaarada waxbarasho iyadoo loo marayo hannaan furan, caddaalad ah oo la heli karo iyo sare u qaadista sinnaanta iyo kala-duwanaanshaha baddallada iyo oggolaanshaha ardayda.
- **[6.10.022-P: “Siyaasadda Ikhtiyaarada Waxbarashada.”](#)** Siyaasaddu waxay raadinaysaa inay hirgeliso yoolal iyadoo siinaysa ardayda iyo qoysaskooda taageerada ay u baahan yihiin si ay u sameeyaan doorashooyin xogogaal ah ee ikhtiyaarada waxbarasho ee kala duwan, iyo inay siiso tilmaamo iyo habraacyo joogto ah marka la eego ikhtiyaarada waxbarasho.

Dheellitirka isqorista iyo barnaamijku waxay qayb ka yihiin dadaalada dhinacyada badan ee degmadu waddo si ay u hagaajiso isticmaalka tasiilaadka PPS annagoo dhinaca kalena taageerayna dadaaladayada [dib uga fekeridda waayo-aragnimada dugsiya](#) ee ardayda, gaar ahaan dugsiya dhexe. Hannaanku wuxuu ku bilaabmi doonaa dugsiyada koonfurbera marka la isku diyaarinayo furitaanka dugsiya dhexe ee Kellogg Middle School dayrta 2021.

Siyaasaduhu waxay hagi doonaan shaqada, taasi oo ay ku jiri doonto kaqaybgal qoto dheer ee xubnaha bulshada kuwaasi oo noqon doona cidda nala wadaysa dadaalkan.